IIB MA GALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـــدة الرسميـــة

Sannadka 13aad Muqdisho 1da Agoosto 1985 L. 8

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL BIL AH — جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar walba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 16 ee 29 Luulyo 1985, Ansixin BOG. 542
Sharciyada la soo saaray 1.1.1985 ilaa
23 Juunyo 1985.

QAYBTA LABAAD

XEER

W. M.

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.
DAWLADDA HOOSE MUQ. 30.1.85, Naado
Dhul J/le Naaji Cabdulaahi Cali L. 277
DAWLADDA HOOSE MUQ. 30.1.85, Naado
Dhul J/le Maxamuud Jaamac Aadan
L. 278

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

DAWLADDA HOOSE MUQ. 30.1.85, Naado Dhul J.le Maxamuud Jaamac Aadan L. 279 » 545

DAWLADDA HOOSE MUQ. 13.3.85, Naado Dhul J.le Maxamed Saciid Aadan L.280 » 546

DAWLADDA HOOSE MUQ. 13.3.85, Naado Dhul J.le Maxamed Saciid Aadan L.281 » 547

DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.3.85, Naado Dhul J.le Cabdiraxmaan Sh. Maxamed L. 282 » 548

DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.3.85, Naado Dhul J.le Bashiir Nuur Cali L. 283 » 549

DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.3.85, Naado Dhul J.le Maxamed Cali Cabdi L. 284 » 550

DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.3.85, Naado Dhul J.le Bashiir Nuur Cali L. 285 » 551

DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.3.85, Naado Dhul J.le Abuukar Cali Xaaji L. 286 » 552

DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.3.85, Naado Dhul J.le Maxamed Sheekh Cali L. 287 » 553

DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.3.85, Naado Dhul J.le Cabduraxmaan M. Maxamuud L. 288 » 554

DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.3.85, Naado Dhul J.le Faaduma Maxamed Cosoble L. 289 » 555

DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.3.85, Naado Dhul J.le Xuseen Faarax Yuusuf L.290 » 556

DAWLADDA HOOSE MUQ. 11.3.85, Bed. Naado Dhul Warsame Barre Jumcaale L. 291 » 557

DAWLADDA HOOSE MUQ. 27.3.85, Bed. Naado Dhul J.le Cosob Maxamed Xayd L. 292 » 558

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.7.85, Lumid Jeeg.War. L. 0364792 ku qoran Maxamed Axmed Cigaal L. 293 » 559

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 9.6.85, Lumid Buug Kayd L. 23395 ku qoran Cureeji Bootaan Warsame L. 294 » 560

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 1.6.85, Lumid Buug Kayd L. 26082 ku qoran Xasan Maxamed Jaamac L. 296 » 561

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA, 11.7.85, Lumid Jeeg.War. L. 437910 ku qoran Maxamed Cabdullaahi Qaalib L. 297 » 562

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA, 22.7.85, Lumid Jeeg. War. L. 593229 ku qoran Faaduma Maxamed Aadan L. 298 » 563

SOMAG LTD. DHISMO SHIRKAD L. 295 » 564

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 16, taariikh 29 Luulyo 1985, Ansixin Sharciyada la soo saaray 1.1.1985 ilaa 23.6.1985.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la ansixiyay Sharciyada soo socda:-

1. Sharci lam. 3 ee 3.4.1985: Heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Shiinaha Dadka, kuna saabsan Iskaashiga xagga dhaqaalaha iyo Farsamada;

2. Sharci lam. 4 ee 3.4.1985: Heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Kenya, kuna saabsan horumarinta Dalxiiska;

3. Sharci lam. 5 ee 20.4.1985: Heshiis dhaqameed oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Kenya, kuna saabsan wax wada qabsiga xagga waxbarashada, sayniska, caafimaadka, warfaafinta iyo isboortiga;

4. Sharci lam. 6, ee 20.4.1985: Heshiis dhexmaray Dawladaha Jaamacadda Carabta ku jira laguna dhisay Xarun Carbeed ee Baarista Dhulalka lama degaanka ah;

5. Sharci lam. 7 ee 27.4.1985: Wax ka beddelidda Sharciga Hawlaha Difaaca Qaranka;

6. Sharci lam. 8 ee 2.5.1985: Heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo

Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan ka qeyb galka maalgelinta Mashruuca Horumarinta Kalluumeysiga Badaha Waqooyi Galbeed;

7. Sharci lam. 9 ee 6-5-1985: Heshiis dhexmaray Dalalka ACP iyo EEC laguna oggolaaday Axdiga LOME' 3aad;

8. Sharci lam. 10 ee 30-5-1985: Heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Caalamiga ah ee Horumarinta Beeraha (IFAD) kuna saabsan ka qeyb galka maalgelinta Beeraha Waqooyi Galbeed;

9. Sharci lam. 11 ee 30-5-1985: Heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Wakaaladda Horumarinta Caalamiga (IDA) kuna saabsan ka qeyb galka maalgelinta Mashruuca Horumarinta Beeraha Waqooyi Galbeed;

10. Sharci lam. 12 ee 16-6-1985: U rogid Sharci; Xeerka Sharci lam. 1 ee 1-5-1985, «Madax 'bannaaneynta miraha beeraha»;

11. Sharci lam. 13 ee 16-6-1985: U rogid Sharci, Xeerka Sharci lam. 2 ee 1-5-1985;

12. Sharci lam. 14 ee 16-6-1985: Heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraaidga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Kenya, kuna saabsan Ganacsiga is-dhaafsiga Badeecooyin;

Qod. 2aad

Ansixintan waxay dhaqan geleysaa laga billaabo 3-7-1985, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 29 Luulyo 1985

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

# DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Naaji Cabdiraxiim Cali uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 18.1.84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada ——.—— Qaabkiisuna yahay Afar Gees isle'eg Addimihiisuna yihiin 13,50X13,50 kuna fadhiya 182,50 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul dad

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 30 Gen. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

J.le Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 277

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J·le Maxamuud Jaamac Aadan uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 3·1·84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Rettangolo Adimihiisuna yihiin mt.13·5X13·5 kuna fadhiya 182,25/= MQ·

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad

Koonfur waxaa ka xiga: Waddada C·Q·S·

Galbeed waxaa ka xiga: Guri dad

B a r i waxaa ka xiga: Wddada 26 Jun

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 30 Gen. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH· EE D/H·

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L· 279

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamuud Jaamac Aadan uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 3.1.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hawl Wadaag Qaabkiisuna yahay Afar Gees Addimihiisuna yihiin ——— kuna fadhiya 540 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Dhul dad |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Waddo |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Dhul dad |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul dad |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 30 Gen. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 278

## DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamed Saciid Aadan uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 10.10.81 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA IHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi Waxaa ka xiga: | Dhul Lambar 283 W. |
| Koonfur Waxaa ka xiga: | Dhul Lambar 269 W. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Jid |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lambar 275 W. |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 13 Mar. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
J.le Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 280

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J·le Maxamed Saciid Aadan uu soo qorttay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikh-du ahayd 10·10·81 uu ku weydiistay ga'bal dhul Dawla-deed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaab-kiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 60X30 kuna fadhiya 1800 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lambar 71 W·

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam· 83-96-105 W·

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 13 Mar· 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH· EE D/H·
J·le Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 281

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J·le Cabduraxmaan Sheekh Maxamed uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 25·2·84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wardhiigley Qaabkiisuna yahay Afar gees Isle'eg Addimihiisuna yihiin 13,5X13,5 kuna fadhiya 182,25 MQ·

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lambar 4 W·

Koonfur waxaa ka xiga: DWaddada Ummadda

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lambar 1 S·

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 28 Mar· 1984
AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH· EE D/H·

J·le Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 282

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DDHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Bashiir Nuur Cali uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 20.9.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 27X15,90 kuna fadhiya 429,30 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Guri

Koonfur waxaa ka xiga: Guri

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.
Muqdisho, 28 Mar. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

J.le Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 283

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J·le Maxamed Cali Cabdi uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 20·2.84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hawl-wadaag Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X27 kuna fadhiya 310 MQ·

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Maxamed Jaamac

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah·

Muqdisho, 28 Mar· 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH· EE D/H.

J·le Maxamuud Cabdi Cismaan

L· 284

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Bashiir Nuur Cali uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 2.10-83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 15X40 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lambar ———

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 28 Mar. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

J.le Maxamuud Cabdi Cismaan

L 285

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J·le Abuukar Cali Xaaji uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu 2.2·82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Trabesiyo Addimihiisuna yihiin (22+4). 35:2= kuna fadhiya 455 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhulkiisii hore

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad

B a r i waxaa ka xiga: Dhul dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah·

Muqdisho, 28 Mar· 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH· EE D/H·

J·le Maxamuud Cabdi Cismaan

L· 286

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J·le Maxamed Sheekh Cali Ciise uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 21.2.84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Yaaq-Shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 20X25 kuna fadhiya 500 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Cali Xaaji

Koonfur waxaa ka xiga: Waddada C.Q.S.

Galbeed waxaa ka xiga: Cali Aadan

B a r i waxaa ka xiga: Kullan

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 28 Mar. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

J·le Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 287

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamuud Cabduraxmaan Maxamed uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 12.1.84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hawlwadaag Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuyihiin 7X20 kuna fadhiya 210 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lambar 7

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Kacaanka

B a r i waxaa ka xiga: Dhulkiisii hore

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 28 Mar. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

J.le Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 288

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J·le Faaduma Maxamed Cosoble uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 10.3·84 uu ku weydiistaty gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Elle Rettangolar Addimihiisuna yihiin (24X24) + (12X12) = mq· 720 kuna fadhiya 720 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooiy waxaa ka xiga: Dhul Lam. 1420-2421

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah·
Muqdisho Mar· 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

J·le Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 289

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Xuseen Faarax Yuusuf, Baashir Ismaaciil Axmed uu soo qortay arji Waaxda hulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 4.9.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Jidka Afgooye qaa'bkiisuna yahay Elle Rettangolar Addimihiisuna yihiin 100, 120, 130, 200, 140, 75 kuna fadhiya 51.250 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Goofka Cabdullaahi

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

B a r i waxaa ka xiga: Goof

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 28 Mar. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

J.le Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 290

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay J.le Warsame Barre Jumcaale maalintii taariikhdu ahayd 5.1.61 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada Hodon Qaabkiisuna ahaa Afar Gees Isle'eg Addimihiisuna ahaayeen 27X27 kuna fadhiyey 729 MQ. loogana qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa Min. Finanza N. 670839 ee 14.6.61 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud awgeed waxuu ku yaal Wadajir Qaabkiisu waa Rettangolar Addimihiisuna yihiin 40X20 kuna fadhiya 800 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lambar 1368

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lambar 1362

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 1363-1365.
Muqdisho, 11 Mar. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L 291

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay J.le Cosob Maxamed Xayd maalintii taariikhdu ahayd 2.10.76 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada Hodon Qaabkiisuna ahaa Rettangolar Addimihiisuna ahaayeen 50X30 kuna fadhiyey 1500 MQ. looga qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hodon sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa WHG/3/23/190 ee 29.1.80 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud awgeed wuxuu ku yaal Deg. Hodon Qaabkiisu waa Rettangolar Addimihiisuna yihiin 25X24,50 kuna fadhiya 612,50 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | J.le Axmed Maxamed |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Waddo |
| Galbeed waxaa ka xiga: | J.le Faaduma Cumar |
| B a r i waxaa ka xiga: | Waddo |

Muqdisho, 27 Mar. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 292

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MAXKAMADDA G.B.

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga dhumay uu lambarkii-

su ahaa 0364792 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Maxamed Axmed Cigaal sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 006494 taariikhdeeduna tahay 9.7.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.85.

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Lam. 0364792 ee ku qoran Maxamed Axmed Cigaal ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa u bedelo Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameeyso mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.7.1985

GARSOORAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 293

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;
HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 23395 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh. So. 29.095,54 uu iska lahaa Cureeji Bootaan Warsame sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay ——— taariikhdeedu 6.6.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 23395 oo ku qoran magaca Cureeji Bootaan Warsame ayna ku jirto Sh.So. 29.095,54/=

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u badalo Cureeji Bootaan Warsame Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 9.6.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr.Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 294

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;
HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 26082 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 10.000/= uu iska lahaa Jaalle Xasan Maxamed Jaamac sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 00388 taariikhdeedu 26.5.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 26082 oo ku qoran magaca Xasan Maxamed Jaamac ayna ku jirto Sh.So. 10.000/=

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u badalo Xasan Maxamed Jaamac Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 1.6.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Ca'bdullaahi Maxamed Maax

L. 296

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA
DIGIREETO: Cusbooneysiin Jeeg Wareega oo Lumay Lambar yahay 437910.
Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Cabdullaahi Qaalib, ee ku taariikhaysan 19.5.85, uuna ku codsanaayo cusboonaysiinta Jeegga Wareega ee sare ku qoran ee lumay;
MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga ee Lambarkeedu yahay 0969 ee taariikhdeeduna tahay 6.7.85, ayna ku caddeeyeen in jeeggaas lambarkiisu sare ku qoran yahay la sameeyay 30.12.84 lacagtiisuna tahay 10,000/= Sh.So. lagana sameeyay Laanta Hargaysa, loona sameeyay Xasan Samatar Jaamac;
MARKUU ARKAY: Taarka Faafinta Bangiga ee taariikhdiisuna tahay 19.1.85, ee Bangigu Laamihiisa u wada diray;
MARKUU ARKAY: 69-70 ee X.L.Y. 2 ee soo baxay 9.9.65kii;
MARKUU ARKAY: In lacagta Jeeggaas uu ku qoran yahay iskana leeyahay Maxamed Cabdullaahi Qaalib.
In la kánsal gareeyo Jeegga Wareega ee Lumay ee

WUXUU GO'AAMIYEY

Lambarkiisu yahay 437910, loona cusboonaysiiyo Maxamed Cabdullaahi Qaalib, cusboonaysiintana gacanta laga saaro Jaallahaas ama cid awood buuxda ka haysata, muddo 15 casho gudahood ah ka dib maalinta go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J.D.Soomaaliya.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa in lagu dhajiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaas lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaanaa.

Hargaysa, 11.7.1985
Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)
Kaaliyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargay
(Xuseen Ismaaciil Axmed)

L. 297

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

DIGIREETO: Cusboonaysiin Laba Jeeg Wareega oo Lumay Lambarradooduna kala yihiin 1) J. W No. 602501, 2) J.W.No. 593229.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Faadumo Maxamed Aadan, ee ku taariikheysan 20.7.85, ayna ku codsanayso cusboonaysiinta labada Jeeg Wareega ee sare ku xusan, lagana kala sameeyey kan kowaad Laanta Burco kuna qoran yahay Faarax Cali Axmed Lacagtiisu dhan tahay 20,000/= Shillin. (2) Kan labaadna laga sameeyey Laanta Boorame, kuna qoran Mawliid Maxamuud Qawrax;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, ee Lambarkeedu yahay 1031 ee 21.7.1985 ayna ku soo caddeeyeen labadaas Jeeg ee kala ah:-

1) J.W.No. 602501 ku qoran Faarax Cali Axmed Lacagtiisu dhan tahay 20,000/= Shillin lana sameeyey 4.5.85 lagana sameeyey Laanta Burco;
2) J.W.No. 593229 ku qoran Mawliid Maxamuud Qawrax, lacagtiisu dhan tahay 20,000/= Shillin lana sameeyey 4.6.85 lagana sameeyey Laanta Boorame;

MARKUU ARKAY: Taarka Faafinta Bangiga ee taariikhdiisu tahay 8.6.85 ee Bangigu Laamihiisa u wada diray;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee X.L.Y. 2 ee soo baxay 9.9.65kii;

MARKUU ARKAY: In lacagta Labadaas Jeeg ee sare aan ku soo sheegay ay iska leedahay Faadumo Maxamed Aadan

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegagga Wareega ee Lumay ee aan lambarkooda kor ku soo sheegnay kala yihiina:- J.W. No. 602501 iyo 593229, loona cusboonaysiiyo Faadumo Maxamed Aadan, cusboonaysiintana gacanta laga saaro Jaallahaas ama cid awood buuxda ka haysata muddo 15 casho gudahood ah ka dib maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J.D.Soomaaliya.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegaggaas lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Hargaysa, 22.7.1985

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Maxamuud Jaamac Cigaal)

L. 298

SOMAG, LTD

Saldhigga: Muqdisho - Ra'asumaalka: Sh.So. 1.00.000,-

DHISMO SHIRKAD

Waxaa maalinta 8da Juuniyo 1985, Qoraal Lamb. 29999 REB. oo uu qoray Notaayo Dr. Mahamuud Xuseen Diirshe, lagu dhisay Shirkadda Saamiley ah SOMAG, LTD., oo saldhigeedu yahay Muqdisho, Ra'asumaalkeeduna ah Sh.So. 1.000.000,-. Ujeedadeeduna tahay guud ahaan fulinta howlaha beeraha, xannaanaha digaagga, xoolaha hilibka loo dhaqdo (daiary beef cattle), tacabka badarka, farsameynta cuntada (food producessing), iyo wax alla waxii kalee la xiriira farsameynta iyo sanceynta muntajaadka beeraha (agricultural industry).

Qoraalka Dhismaha oo kor ku xusan waxaa lagu Diiwaangeliyey Muqdisho 9 Juuniyo 1985 lambar 1202 Atti Pubb., Vol. 24. Waxaana Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir oo uu ansixiyey 15ka Juuniyo 1985, kaddibna maalinta 16ka Juuniyo 1985 waxaa lagu qoray Buugga Shirkadaha ee Xafiiska Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir, lamb. 1980.

Isla Qoraalka Dhismaha waxaa lagu magacaabay Guddiga Maamulka ee Shirkadda oo ka kooban:

YUUSUF NUUR XASAN: Guddoomiye/Maamule Idman.

BASHIIR XAAJI MUUSE — CABDURAXMAAN NUUR XASAN — TERRANCE JOSEPH KAESER — J.R. RINEHART: maamulayaal.

Guddiga Maamulka waxaa awood buuxda loo siiyey in ay kordhin karaan ra'asumaalka shirkadda ilaa Shs.So. 10.000.000,-, iyadoo la soo saari doono saamiyo cusub oo caadi ah. Kordhintaas waxaa la sameyn karaa hal mar, amaba dhowr mar, sannad gudahiisa, lagana bilaabo maalinta Shirkadda lagu qoro Buugga Shirkadaha.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 297